Qabashada Dhageysiga Dacwadaha Qoyska
Qareenada Iyo Dhinacyada Kala Duwan

MAXKAMADDA SARE EE DEGMADA KING

Nidaamka Jadwalka Ee Dhageysiga Dacwadaha Qoyska

Talaabada 1aad: Hubi in jadwalka dhageysiga uu yahay nooca dhageysiga dacwadaha ee aad dooneyso in aad qabsato

1. Xiliga Amarka Xaaladaha Degdegga ah 24, inta badan codsiyada dacwadaha qoyska ayaa la soo bandhigaa iyada oo dhageysiga dacwadaha qoyska lagaga qeyb qaato telefoonka ama fiidiyoow; dhageysigu qofku yimaado waxaa la qabtaa oo kaliya marka aysan suurogal aheyn in lagu dhageysto telefoonka ama fiidiyoow.
   a. Dhamaan codsiyada uu inta badan dhageysan jiray garyaqaan (sida uu dhigayo sharciga FLR 5) waxaa lagu daray oo lala dhageystaa dacwadaha jadwalka codsiyada dacwadaha qoyska, marka laga reebo xaaladaha laga reebo dacwadaha Waalidka Aanu Ilmaha La Nooleyn, iyo xaaladaha degdegga ah ee la xiriira COVID-19-ee wax ka bedel ku meel gaar ah lagu sameeyo (iyada oo aan la soo gudbin codsi wax looga bedelayo) waxaa dhageysta qaaliga loo xil saaray, ama haddii aanu jirin qaali loo xil saaray, madaxa qaaliyada UFC.
   b. Jadwalka codsiyadaha dacwadaha waxaa la dhageystaa kaliya galabtii, jadwalka 1:30 Galabnimo. Jadwalka aroornimada ee codsiyada dacwadaha qoyska waxa uu gaar u yahay Amarka Kala Badbaadinta ee Dagaalka Qoyska Dhex Mara.
   c. Codsiyada guud ee dacwadaha qoyska waxaa lagu daraa jadwalka garyaqaanka (commissioners) marka laga reebo codsiyada lagu codsanayo in maxkamaddu kala saarto dhinacyada (codsiyada lacagta ilmaha loo jaro), codsiyada la doonayo in la hor geeyo Garyaqaanka FL iyo codsiga gobolka/difaaca ee lacagta ilmaha loo jaro iyo jadwalka waalidnimada ilmaha/wax ka bedelka) ayaa iyagana la raaciyaa iminka. Dhamaan codsiyada dacwadaha qoyska ee uu dhageysanayo gar yaqaanku waa in la qabtaa maalinta sax ah ee todobaadka (akhri talaabada 2, #3); codsiyada guud ee dacwadaha qoyska, dhinacyada soo gudbinaya codsiga waa in ay hubiyaan in codsigooda la dhageysan karo ka hor inta aan la qaban taariikhda (akhri, Talaabada 2, #2).

Talaabada 2aad: Doorashada taariikhda saxa ah ee dhageysiga:

1. Dhamaan codsiyada guud ee dacwadaha qoyska, waa in codsiga la diiwaan geliyaa oo dhinaca kale la gaarsiiyaa 14 cisho ka hor. Jawaabta waa in maxkamadda laga diiwaan geliyaa duhurnimada 5 cisho ka hor maalmaha maxkamadaha. Jawaabta (haddii ay jirto) waa in laga diiwaan geliyaa maxkamadda ugu dambeyn duhurnimada 3 maalmood ka hor taariikhda dhageysiga.
2. Jadwalka codsiyada dacwadaha qoyska waa mid aan inta badan la helin. Hubi barta internetka ee jadwalka https://tinyurl.com/KCFLMtnDate si aad u ogaato in meeli ka banaan tahay.
3. Waa in aad doorataa maalinta saxa ah ee todobaadka ee taariikhda dhageysiga, taasoo ku xiran haddii uu qareen ka qeyb qaadanayo dhageysiga:

HADDII UU QAREEN MATALAYO MID KA MID AMA LABADA DHINAC, BALANTA DHAGEYSIGA WAA IN AAD KA DHIGTAA:	HADDII LABADA DHINAC IS MATALAYAAN, WAA IN AAD DHAGEYSGA KA DHIGTAAN:

ISNIINTA 1:30 DUHURNIMO	**ARBACAO 1:30 Duhurnimo**
TALAADADA 1:30 DUHURNIMO	**JIMCAHA 1:30 Duhurnimo**
KHAMIIS 1:30 DUHURNIMO	

4. Codsiyada guud ee dacwadaha qoyska waxaa la dhageystaa iyada oo aan laga doodin haddii labada dhinac heshiis gaaraan. Haddii aan laga doodin waxa ay ka dhigan tahay in codsiga go'aan looga gaaro qoraalada loo soo gudbiyo maxkamadda , iyada oo dhinacyada ama qareenadu aanay ka qeyb qaadan dhageysiga. Inta badan ma jiro waqti maxkamaddu ku dhageysato iyada oo aan laga doodin, iyada oo aan loo eegin in ay dacwaddu tahay SEA ama KNT. Waa in aad ka hubisaa barta internetka ee https://tinyurl.com/KCFLMtnDate si aad u ogaato in ay meel ka banaan tahay. Marka aad qoreysaan heshiiska, waa in aad caddeysaan in *labada dhinac* isku raaceen codsiga iyada oo aan maxkamadda looga doodin. Dhamaan qodobada kale ee hoos ku xusan ee nidaamka ayaa khuseeya codsigan.

Talaabada 3aad: Buuxinta iyo diiwan gelinta Ogeysiiska Taariikhda Dhageysiga:

1. Codsiyada guud ee dacwadaha qoyska, *marka laga reebo* Codsiga jadwalka TBA , Codsiga Dib U Tixgelinta, iyo xeer ilaalinta/difaaca ee taageerada dhaqaale ee caruurta ama jadwalka wax ka bedelka waalidnimada/wax ka bedelka, adeegso foomka Ogeysiiska taariikhda Dhageysiga - Gar yaqaanka FL si aad boos uga qabsato jadwalka. Dooro SEA dacwadaha Seattle, KNT dacwadaha Kent.
2. Jadwalka laguma darayo dhageysiga dacwadaada ilaa aad Ogeysiiska Taariikhda Dhageysiga ka diiwaan geliso maxkamadda oo laga sahqeeyo.
3. Foomamka Ogeysiiska Taariikhda Dhageysiga - Garyaqaanka FL waxaa laga heli karaa jadwalka hoos u soo dhaca ee foomamka xogheynta KCSC ee **htttps://tinyurl.com/ClerkForms**.
4. Jadwalka codsiyada in Maxkamaddu Go'aan ka Gaarto Dacwadda (wax ka bedelka lacagta ilmaha loo jaro), codsiyada dib u eegista dacwadaha qoyska ee gar yaqaan, iyo codsiyada xeer ilaalinta/difaaca ee lacagta ilmaha loo jaro, isticmaal foomka Ogeysiiska Taariikhda Dhageysiga - Codsiyada Aan La Raacin - Gar yaqaanka FL Dooro SEA dacwadaha Seattle, KNT dacwadaha Kent.
5. Foomamka Ogeysiiska Taariikhda Dhageysiga –- Codsi- Garyaqaanka FL waxaa laga heli karaa jadwalka hoos u soo dhaca ee foomamka xogheynta KCSC ee **htttps://tinyurl.com/ClerkForms**.

Talaabada 4aad: Xaqiijinta dhageysiga

1. Dhinacyada oo dhan waa in ay u soo gudbiyaan Liiska Qoraalada, ee halkan ku xusan https://tinyurl.com/KCSCFLSubList
   a. Dhinaca codsanaya waxaa WAAJIB ku ah inuu soo gudbiyo liiska ugu dambeyn **duhurka 3 maalmood oo maalmaha shaqada ah ee dhageysiga**, si uu u xaqiijiyo dhageysiga. Haddii aan liiska la soo gudbin waqtiga loo qabtay, dardaaranka lama xaqiijinayo, mana jirayo dhageysi maxkamadeed.
   b. Dhinaca ka jawabaya waa inuu soo gudbiyaa Liiska, **duhurnimada maalinta 5 shanaad ee maalmaha shaqada** marka loo qabto in la soo gudbiyo jawaabta.
2. Amarada maxkamadda loo soo gudbinayo ee dhinacyada kala duwan waa lagu soo diraa barnaamijka "Word" ee Liiska ay soo gudbinayaan taariikhda loo qabtay:
   - KNTFLOrders@kingcounty.gov codsiyada loo soo qoro Kent, iyo

- SEAFLOrders@kingcounty.gov codsiyada loo soo qoro Seattle

Cinwaanka iimeylkaaga waa waajib in ay ku qorto:

a. Taariikhda dhageysiga,
b. Haddii aad tahay dacwoodaha iyo la dacweeyaha,
c. Magaca iyo Lambarka Dacwadda

Tusaale: **Ujeedo: 7/6/2020, Pet, WILSON, 20-3-xxxxx-x SEA**

(Iimeylka lagu soo diro **lagama** jawaab, **mana** aha in lagu soo diro macluumaad xasaas ah.

Nidaamka Codsiga in Maxkamaddu Go'aan ka gaarto Dacwadda

- Jadwalka Dhageysiga Maxkamaddu ka gaarto go'aanka ugu dambeeya (TBA) waxaa dhageysta gar yaqaanka maxkamadda.
- Dhinacyada waxaa laga doonayaa in ay soo gudbiyaan Warqadaha Dacwadda Buug lagu soo koobay oo Bac ka sareyso qolka warqadaha ee (C-203 ee Seattle; 2D ee Kent).
- Warqadaha dacwada ee dhinaca codsanaya/Buugga Dacwadda/Liiska waxa ay *xaqiijinayaan* dhageysiga dacwadda.
- Taariikhaha kama dambeysta ah waa mid ku saleysan marka jadwalka ee dacwadaha iyo sharciyada khuseeya, marka laga reebo warqadaha dacwada ee dhinaca codsanaya iyo Liiska Soo Gudbinta ee la soo raaciyo jawaabta la soo gudbiyey.
- Amarada Maxkamadda loo diyaariyey waa in lagu qoraa WORD oo iimeyl loogu soo diro ka hor taariikhda kama dambeysta ah, ee shaqaalaha ka shaqeynaya dacwadda ee maxkamadda.
    - KNTFLOrders@kingcounty.gov codsiyada loo soo qoro Kent, iyo
    - SEAFLOrders@kingcounty.gov codsiyada loo soo qoro Seattle
- Codsiyada dhageysiga TBA waxaa lagu talo galaa in aan laga doodin sidaas ayaa gar yaqaanku go'aan kaga gaaraa TBA. Si aad u soo gudbiso codsigan noocan ah, isticmaal Ogeysiiska Taariikhda Dhageysiga - Gar yaqaanka FL ee laga helo jadwalka soo dhaca ee foomamka xogheynta ee halkan: **htttps://tinyurl.com/ClerkForms**.

Nidaamka Codsiga Dib U Eegista (Tixgelinta) ee Gar yaqaanka FL

- Si aad u qabsato codsiga dib u eegista ee garyaqaanka dacwadaha qoyska, waa in aad raacaad sharciyada khuseeya. Isticmaal Ogeysiiska Taariikhda Dhageysiga - Codsiyada Aan Jadwalka Ku Qorneyn - Gar yaqaanka si aad u bilowdo codsiga.
- Marka codsiga maxkamadda laga diiwaan geliyo oo la gaarsiiyo dhinaca kale, oo ogeysiisku soo gaaro maxkamadda, waxaa suurogal ah in gar yaqaanku codsado ama aanu codsan in dhinaca kale ka jawaabo. *Haka jawaabin codsiga dib u eegista ilaa aad ka hesho maxkamadda ogeysiis ku faraya in aad ka jawaabto.*
- Codsiyada dib u eegista lagaama doonayo xaqiijin, laakiin dhinaca codsanaya ayaa soo gudbinaya Liiska, iyo iimeyl lagu soo diro Amarka loo diyaariyey maxkamadda oo ku qoran Word shaqaalaha maxkamadda ee ka shaqeynaya dacwadda.
    - KNTFLOrders@kingcounty.gov codsiyada loo soo qoro Kent, iyo
    - SEAFLOrders@kingcounty.gov codsiyada loo soo qoro Seattle

- Haddii maxkamaddu codsato jawaab, dhinaca jawaabta laga codsaday waa in ay soo gudbiyaan Liiska iyo amarka maxkamaddaloo soo jeedinayo oo ku qoran WORD, taariikhda loo qabtay. Haddii dhinaca codsanaya uu diiwaan geliyo jawaab, Liiska soo gudbinta oo la dhameystiray, iyo amarka maxkamadda loo diyaariyey.

Nidaamka Dhageysiga Ee Madaxa Qaaliyada ee UFC

Waalidka Aan Ilmuhu La Nooleyn

- Codsiyada amarada ku meel gaarka ah iyo waxyaabaha ku filan ee keenaya waxaa dhageysanaya qaaliga uu u xilsaaray madaxa qaaliyada (JC).
- Waa in aad la xiriirtaa xogheynta madaxa qaaliyada *ka hor* inta aadan codsiga u qaban taariikhda dhageysiga. haddii aad codsaneyso Amar Muujinaya Jiritaanka Sabab Macquul ah oo degdeg ah, waa in aad u soo bandhigtaa cadeyn muujineysa taariikhda amarku qaaligu ogolaaday. Soo gudbinta cadeynta (sida nuqul iimeylka aad u soo dirtay xogheynta) ee codsigaaga iyo Amarka Muujinaya Sabab Macquul Ah.
- Sharciga oo isbedelay darteed, dacwadaha aanu waalidka la nooleyn ilmaha waa in la dhageystaa dhamaadka 2020 ama la baabi'iyaa. Kala soco isbedelka sharciga halkan.

Codsiyada aan la dhageysan ee Jadwalka Dacwadaha Qoyska:

- Codsiyada degdegga ah ee ku saabsan wax ka bedelka cidda ilmuhu la noolaanayo ee *aan la* soo gudbin Codsi Wax Ka Bedel, ee la xiriira COVID-19, oo la ogolaaday sida uu dhigayo Amarka Degdegga Ah 24, waxaa fariin loo diri karaa qaaliga loo xil saaray ama, haddii aan qaali loo xil saarin, Madaxa Qaaliyada UFC, ***hadii ay yihiin kuwo degdeg ah***.
- Waa in bogga hore ee codsiga lagu caddeeyaa faahfaahin ku saabsan sababta uu u yahay degdeg.
- Codsiyadaas waa in lagu caddeeyaa foomka lagui magacaabo Ogeysiiska Taariikhda Dhageysiga - Qaaliyada kaasoo laga heli karo: https://www.kingcounty.gov/courts/clerk/forms.aspx.

  Codsiyadan laguma daro jadwalka dacwadaha qoyska, laakiin waa la diidaa iyada oo aan mar kale maxkamadda lagu soo celin karin haddii uu qaaligu u arko in aysan ka soo bixin shuruudaha.
- Dhinacyada kala duwan waa in ay ka qabsadaan taariikhda xogheynta qaaliga ka hor inta aysan ka diiwaan gelin maxkamadda Ogeysiiska Taariikhda Dhageysiga - Qaaliyada.